# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 35aad fadhigii 18aad**

**31/12/2017**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga: -**

- Dooda Xeerka Maaraynta qashinka Adkaha iyo Dareeraha

**Gudoomiyaha: -** Waxaynu mudanayaal u balan sanayn dooda Xeerka Maaraynta qashinka Adkaha iyo Dareeraha, markaa xildhibaanadii doonaya inay dooda ka qayb galaan ha is qoreen.

**Guddoomiyaha:** Waxaan ku soo dhawaynayaa;

**Md. Naasir Xaaji Cali Shire**: Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shirguddoonka, Mudnanaayasha iyo xoghaynta Alaamu Calaykum Warmatulaahi Wa barakaatru. Waxaan akhriyey xeerkan Maaraynta Adkaha iyo Dareeraha, waxaan doonayaa in aan is dul taago dhawr meelood oo ubaahan wax ka badel iyo kaabis. Marka u horaysa haddii la eego Page 9 Qodobka 3aad, Waxa lagu cadeeyey in wasaarada deegaanka iyo Reermigu tahay cidda ka masuulka ah ilaalinta horumarinta deegaankaba ay iska leedahay. Xaga dambe waxa lagu sheegay Qodob ha in guddidi ka masuul ah la abuuri doono, si aynu halkaas isu waafajino waxa lagu darayaa Qodobka 3aad farqad 5aad oo odhanaysa " si loo ilaaliyo habsami u socodka hawsha wax aka masuul noqonaysa Guddidaas oo lagu xuso". Si ay su qabsadaan qodobkaas iyo Qodobkaas kale. Haddaan taa ka soo gudbo, waxaan u imanayaa Qodobka 15aad faraqadiisa 5aad oo u dhigan" qashinka dareeraha ah lagu shubi karo dooxyada, dhulka, wadooyinka. Waxa qornaa **balayada** waxay noqonaysaa "Balliyada" waan in sidaas loo saxaa.

Haddaad timaado qodobka 19aad ee ka hadlaaya "fee-ga" waxa cajiiba oo aan si adag uga soo horjeedaa oo u arkaa inay xaaraan tahay adeegan qashinka laga ururinaayo umadda Somaliland in fee laga qaado dadka, waxaan u arkaa in ay iska leedahay oo adeegaa qabanayso Dawladaha hoose, markaa cashuurtaa ay dadku bixiyaan darted waan dawlada hoose lacagtaas bixisaa oo adeegaa dadka u bixisaa. Haddii aan taas ka soo gudbo Qodobka 27aad ee ah abuurida Guddida, waxa la yaab leh oo halkan ku yaala guddida la abuurayaa cida ay ka kooban tahay oo kala ah:

1. Wasaarada deegaanka
2. Wasaarada Qorshaynta
3. Wasaarada Hawlaha Guud.

Guud ahaan waxay ka kooban yihiin 29 xuboon oo ka kala socda wasaarado iyo hay'ado madax banana. Waxaan leeyahay halkee laga helayaa 29 xubnood oo wada fadhiista oo wada shaqaynaya. Waxaan qabaa in dib loogu noqdo guddidaas oo laga dhigo 11 xubnood, way is heli karaan waanay wada shaqayn karaan.

Markaa caqliga ma galayso in la magacaabo 29 kuwaas oo ay kala magacaabayaan:

6 xubnood oo ay magacaabayaan maayirada degmooyinka

5 dumar ayey noqonayaa

2 xubnood waxa magacaabayaa Parliament-ka

2 jaamacadaha ayaa magacaabaya

Waxaan soo jeedinayaa in gudidaas laga dhigo 11 xubnood oo wada shaqayn kara. Page 18 Qodobka 9aad farqadiisa 7aad; waxa la qoray oo la yidhi waxay soo saarayaan nimaad dheeri ah, markaa waxaan leeyahay ma jiro wax la yidhaa nimaad dheeriya. Waxaan ka dhigay Guddidu waxay samaysanaysaa xeer-hoosaad u gaar ah waanay ku shaqaynayaan marka ay doortaan Guddoomiyaha iyo ku xigeenkiisa.

Page 19. Qodobka 32aad: Ciqaab. Farqadiisa 1aad iyo farqadiisa 2aad waxa ku taala dawlada hoose waxay ganaaxaysaa qof kasta oo ku kaca xadgudbayada qodobka 28aad. Qodobkan 28aad ma sheegayo wax ciqaaba, laakiin waxa uu sheegayaa shaqada iyo waajibaadka ay guddidu qabanayso. Markaa waxa halkaas laga dhigayaa 31aad oo ka hadlaya arrimaha qodobka 28aad sheegayo. Markaa qodobka 28aad farqadiisa 1aad iyo 2aad waa laga saarayaa.

Wabilaahi tawfiiq.

**Md. Axmed Barkhad Obsiiyey:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Xildhibaanada, Shir-guddoonka iyo xoghaynta waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu Calaykum Warax matulaahi Wa barakaatu.

Xeerkan markaan akhriyey wax badan Ayaan ku arkay inay ka maqan yihiin sida maaraynta qashinka dareera, kiimikada, daawooyinka, walxaha shoocaaca leh iyo qalabka electronic-ga ah. Qashinka lagu daro maaha hadhaaga daawooyin, waayo waxa laga yaabaa in uu dad wax ka gurto oo uu ka qaato waxlaha hadhaaga ah sida ribadaha, dawooyin, kiimikada iyo suntaba. Markaa anigu waxaan leeyahay waa in lagu daraa sida loo maaraynayo ama loo aasayo, ama godad loogu qodayo qashinka daawooyinka iyo suntan taasna halkaas waan kaga soo darayaa.

Waxa kale oo aan ku soo darayaa cutubka 1aad ilaa ka saddexaad oo aan hal cutub isago dhigayo, waayo cutubkan kuma jiraan qodob guud, isna wuxuu ku daray qodobo guud cusubka 1aad. Dawlada hoose waa inay bilawdo taageerida mashaariicda qashinka, waxa kale oo ka maqan electornigii iyo daawooyinkii.

Waxa kale oo aan ku darayaa cutubka saddexaad Qodobka 6aad hal farqad oo kale oo ah "Qashinka aan cuntada ahayn waa inay ururiyaan ayna kala saaraan sida qodobka 5aad uu

sheegayo" waxaan raacsanay in qalabadaas aan soo sheegay aan lagu dararin qashinka cuntada hadhaaga ah.

Qodobka 25aad halka ay ka yidhaahdeen Waaxda kormeerka Magaalada waxaan ka dhigayaa " Waaxda fayo-dhawrka" awalba waan lahaan jirnay, waana in Hygiene-tu shaqayso oo la soo celiyo. Waxa kale oon hal qodob isaga dhigayaa Qodobada 25aad iyo 26aad.

Ta kale sidii xildhibaan Naasir sheegay qodobkan Guddida lagu samaynayo waa mid faraha ka baxday, markaa waxaan ka saarayaa 6 xubnood ee maayiradu soo magaacabayaan maayiraduna halkooda ha ku eekaadaan. Waxa kale oo aan yaraynayaa oo halkii 6 ahayd ka dhigayaa 2 xubnood oo rayid oo mid dumar tahay. Waxa kale oo aan ka saarayaa 2 xubnood ee macaariifta, waayo wax macaariif la yidhaa maba jirto. Waxa kale oo aan ka saaray 2 xubnood oo Baarlamanka oo mid dumar tahay taasina ma jirto.

Wabilaahi Tawfiiq

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay.

**Md. Ibraahim Axmed Raygal:** Guddoomiye qodobkaan ka hadli lahaa waa la qaatay waad mahadsan tahay.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Alxamdulilaahi Rabil Caalmiin, wa salaatu, Wa salaamu calaa rasuuli lahaa SCW. Shir-guddoonka, Xildhibaanada, kaaliyayaasha iyo saxaafada Aslaamu Calaykum Wa warax matulaahi Wa barakaatu. Guddoomiye inta aanan gelin waxaan doonayaa in aan arrin yar iftiimiyo codsina ah: Waxaan shir-guddoonka u soo jeedinayaa marka aynu dood galno had iyo jeer sida ay u bato dooda xildhibaanadu, waxa ii muuqata in aan la tixgelin tii ugu dambaysay ee ahayd ee dabagalka xoolaha dadweynaha, waxay xildhibaanu ka hadleen oo inta badani sheegtay in la sameeyo guddi dabagalka samaysa oo aan lagu eegin oo kaliya Hanti dhawraha oo qudha, haddii aanay I dhaafin in aan guddidaas la samayn Ayaan filayaa.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Xildhibaan Xaamud dooda toos u galay wixi kale xafiiska ayeynu kaga wada hadlaynaaye.

Doodayu waxa weeye Recycle halkan kuma jiro kuwii horena kuma jirin. Recycle waxa xitaa laga faa'iidaystaa saxarada oo laga dhigaa neef iyo Tamar (Gas and Energy). Caagadahan suuqada daadsan ee carruurto gawaadhiga ku soo hoos tuurayso oo bacdan dhirta isku maraysa laga faa'iidaystaa oo maayac mushtarku waa in ay sameeyaan oo dadka uga faa'iideeyaan qashin, iyaguna ka faa'iidaystaan.Xaafada markaad eegto qashiinkii bulaacadaha ku dhici jiray kuma dhacaan ee suuqay soo maraan, haddaad salaada ku socoto oo aad ku joogtaso waad nijaasoobaysaa, waan hygiene shaqadoodii waana shaqadii dawlada hoose. Haddii aynu nidhaa xeerkan guddi ha loo sameeyo waxba tari mayso yaa fulinaaya waa in dawlad hoose fulisaa. Asalaamu Calaykum Wa raxmatulaahi wa barakaatu.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan

**Md. Axmed Maxamed Carabayto**:  Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu

Waa maanta waa maalintii ugu horaysay ee eraya iga soo baxo, haddii khalad iga soo baxo waad iga raali ahaanaysaan.

Waxaan ka hadlayaa xeerkan Cutubka labaad Qodobka 3aad ee maamulka siinaya wasaarada Deegaanka. Qodobkaasi wuxuu awood siinayaa in Wasaarada Deegaanu Madax ka noqoto ama maamusho, hawshan oo aan u arko inay gabigeeduba hoos imanayso fayo dhawrka. Magacii la doono ha loo bixiyee waa qayb ka mid ah fayo dhawrka. Fayo dhawrku wuxuu diirada saarayaa maaraynta Caafimaadka Dadweynaha, halka siyaasada deegaankuna ay ku wajahan tahay ilaalinta deegaanka, markaa halka qudha ee deegaanku ka soo galo oo ah marka qashin qubku aanu dhibaato u lahayn bini-aadamka, balse uu dhibaato gaadhsiinayo deegaanka. Marka qashinka la aasayo ama la burburinayo aanu dhibaato dadka u lahayn waa marka aanu qashinkaasi qoyanayn oo cudurada faafa sii fidinayn (Infection diseases).  Markaas ayaa deegaanu odhan karaa sida bacaha oo kale deegaan iyo xoolaha ayey dhib ku leeyihiin halkaasna ay ka soo geli kartaa.

Marka aynu ka hadlayno fayo dhawrku waa clusters oo la kala yidhaa:

- Wash Clusters
- Health clusters
- Shelter clusters

Markaas halkaas waxa soo geli kar biyaha, Waxbarashada iyo caafimaadka. Tan kale ee shelters ayaa Iyana ay soo geli karaan Deegaan iyo dawladaha hoose. Siyaasada fayo dhawrka ee Qaranka waxaan ka soo qaaday oo aan hayaa oo aad moodaa in aan la tixgelinba, waxaanu muhiimada koowaad ka ahaa hawshani Wasaarada Caafimaadka, siyaasada fayo dhawrka ee Qarankana way lahaayeen. Wasaarada caafimaadku ma leh, shaqaalaha tababarkana (staff trainers) waxa iska leh waaxda caafimaadka dadweynaha (Public Health officers). Sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in awooda halkan ay ku jirtaa ay khaldan tahay.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay. Imikana waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan:

**Md. Maxamed Faarax Qabile**: Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Inta badan dadka ka shaqeeya qashinka noloshoodu aad bay u hoosaysaa**,** qalabka ay isticmaalayaan ee hawshan ay ku qabanayaan waa mid caafimaadkooda iyo qalab ahaanba aan roonayn. Adduunyada gaadhi mayno markaa Japan oo kale ceebta ugu weyn ee qofka gaadhaa ay tahay ceeb soo gaadha, inaguna taasi gaadhi mayno. Adduunyada maanta waxa jira dhaqaale loo qoondeeyey (Budget Allocation) iyo qalab waayo waxa la sahaminayaa ama la u gaadhsanayaa waa qashin.

Waxaan qabaa inta la dhayal sanayo nolosha dadkaas, tababarkooda, qalabkooda iyo mustawaha noloshooda oo kor loo qaado in aan laga baxayn in nadaafad xumadan laga gudbo. Adduunyada ma talan ka soo qaad dalka Ingiriiska oo kale lama qoro dad aan muwaadiniin ahayn, waxayna ku jiraan nolosha ugu mushaharka weyn oo xitaa Baarlamaanadooda ka mushahar badan yihiin.

Anigu waxaan qabaa sources ugu badan ee laga helayo iyagaa helaya, laakiin in daryeelka shaqaalahaas noloshooda wax laga badelo oo kor loo qaado dalacaaduna ka bilaabanto halka ugu hoosaysa ilaa xaga ugu saraysa.

Dadkaasi markay isu arkaan inay noloshoodaasi jirto, iyagaa qalabkooda iibsanayaa, iyagaa dadaalkooda samaynaaya, iyagaa qaabka ugu wanaagsan iyo u ugaadhsigeeda soo saaraaya hawsheedana socodsinaaya. Asalaamu Calaykum Wa raxmatulaahi wa barakaatu.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay. Imikana waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan:

**Md. Axmed Cabdi-Nuur Kijaandhe:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye aad ayaad ugu mahadsan tahay in aad I siiso dooda xeerka Maaraynta Qashinka adag iyo dareeraha, saaxiibadayna waan salaamayaa. Runtii xeerkani waa aad iyo aad ayuu muhiim u yahay, imikaan xeerka ka qaatay in aad akhriyo fursadna umaan helin in aan shalay qaato oo hawl kale Ayaan ku maqnaa. Waxaan fursad u helay in aan imika akhriyo xeerka waxaad moodaa in aanu diriiqii saxda ahaa aanu ahaynin.

Sidii Dr. Carabato uu uga hadlayey qashinka maarayntiisa, eegistiisa iyo maamulidiisa waxa iska leh wasaarada caafimaadka. Meel ay ka soo gasho wasaarada caafimaadku ma jirto, waxaanay u eeg tahay in Wasaarada Deegaanku ay doonayso in ay soo jiidato shaqo aanay lahayn, markaa qashinka laga hadlayo ee deegaanka dikhiliya waa nuclear-ka iyo wixii la xidhiidha, laakiin qashinka aqalka laga soo saaro maaha ka wax wasakhiiyee waa haadhaga warshada sida warshada hargaha oo kale, laakiin qashinka guriga laga soo saarayo waxa iska leh dawladaha hoose iyo Wasaarada caafimaadka oo kormeerta.

Waxaad aad iyo aad looga cawdaa Guddoomiye in xeerarka aynu soo saarnaa lahayn wax tayo ah ama saamayn ah oo nay nolosha dadka waxba ka bedelin, taasna waxa ugu wacan tayada xeerarka aynu soo saarno oo aad u liita. Imika waan eegay waxa qoray dad aan aqoon u lahayn.

Anigu waxaan ka mid ahaan jiray shirkadaha qashinka gura, markaa guddoomiye arrinkan dawlada hoose wax ha laga siiyo, iyagaa inta badan hawlahan qabta iyo wasaarada caafimaadka oo iyaduna kormeerta. Nimankan ay leedahay wasaarada deegaanku waxbay tababaraysaa waxay u eeg tahay wax lacag lagu raadinayo. Tababarayaashaas ay sheegayaan waxay buuxaan wasaarada caafimaadka iyaga oo waayo arag ah, waa arag khuburo ah oo intaas oo sanno ka soo shaqaynayey. Niman yahaw halkii aynu ka soo saari lahayn xeerar nolosha dadka wax ka bedela yeynaa soo saarin xeerar hay'adaha madaxa isu geliya oo buuq abuura, waxaanan leeyahay xeerkani muu soo marin ciddii lahayd, waana in aynu shaqooyinkan qaybinaa cid walbana shaqadeeda siinaa.

Waxa kale oo jira in tayada sida uu u qoran yahay xeerkuna aanu wanaagsanayn. Haddaan hoos u galo qashinka cuntooyinka ama hoteelada cuntada oo kale, waxaanu leeyahay hoteelku waa inuu qashinka hagaajaa, hagaajaa oo kaliya maahee maadaama oo uu xeer yahay waa in uu yidhaahdaa waa in uu leeyahay weel qashinka lagu qaado oo mugiisu intaas yahay, waa inuu

leeyahay baytalmay, waa inuu leeyahay bulaacad lagu shubo, markaa xeerka tayadiisu ma wanaagana.

Markaa waa in la yidhaa hotelku aan lahayn baytalmay, bulaac, faraxal lagama dhigi karo hotel, waana marka ninka dawlada hoose ka socdaa uu hubiyaa in hotelku waxaas oo dhan leeyahay. Imika haddaa habeenkii suuqa u soo baxdo waa bulaacado rogmanaya, sababtuna waxa weeye inta Nin kastaa meel u dhigo bulaacada ayuu habeenkii suuqa ku soo daadinayaa.

Waxaan ku soo gaba-gabaynayaa xeerkan ha loo celiyo oo wax ha laga siiyo Dawladaha hoose iyo Wasaarada Caafimaadka.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay. Imikana waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan:

**Md. Yuusuf Liibaan Cumar:** Shir-guddoonka iyo xildhibaanaduba way salaaman yihiin. Marka hoos ugu daadego xeerka kan, in kasta oo xeerkan saaka uun aan arkay, haddana marka la eego waxaad moodaa dabeecada xeerkani leeyahay in aanu ahayn mid lagu dhiqi karo dalka, sababtuna waxay tahay xeerka kan waxaad moodaan in dad waxa uu qabanayo aqoonteeda layani ka shaqeeyeen ama sameeyeen. Marka la eego sharciga xeerkani ka hadlayo waa xaalado wax dareere ah, wax qalalan ama wax sun kiimiko ah. Xeerkani waa in uu ku salaysnaadaa in aqoonteeda leh oo aanu noqon mashruuc qof loo dhiibay oo lacag lagu guranayo ama mid inagula soo dhex tuuray oo hadhaw ceebtiisa iyo fadeexadiisuna Golaha dhakada ka fuusho.

Waxaan soo jeedinayaa in xeerkan dib loogu celiyo cidda aqoonteeda leh oo ah Dawladaha hoose, Wasaarada Caafimaadka iyo hay'adaha kale ee uu khuseeyo. Haddii aynu gacmaha iska taagnana waxay noqonaysaa mid ceebtiisu buuga inoo gasha. Guddoonka iyo Goluhuba wuu mahadsan yahay.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Mudanayaasha waxaan u soo jeedinayaa oo xeerka la inoogu keenan in wixii khaldana aynu saxno oo qodob loo akhriyo qodob qodobna loo dul istaago, markaa waxna aynu ku darno waxna aynu ka saarno**.** Imikana waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan:

**Md. Baar Siciid Faarax:** Bismilaahi Raxmaani Raxiim waan idin salaamayaa Asalaamu Calaykum Wa raxmatulaahi wa barakaatu. Xeerkani horta waa xeer aad u miihm ah, waxaana ku qoran wax badan oo muhiim, haddana wuxuu u baahan yahay in waxna lagu daro waxna laga bedelo. Qodobka 3aad ee Wasaarada Deegaanka anigu waxaan is leeyahay wax shaqo ah kuma laha xaqiiqdii, laakiin way ka hadli kartaa dhulka daaqsinka ah ee xashiishka lagu qubayo, laakiin waxaan is leeyahay qashaqadeedii maaha.

Xashiishka ama qashinku dhibaato badan ayuu ku hayaa magaalada yacnii magaalada waa la dhex mari kari la'yahay wax ka masuul ahna la garan mayo xaqiiqdii. Qashinka waad ogtihiin in dawladaha hoose ay ku shuqul leeyihiin, laakiin sida aad la socotaan waxa imika ka masuul ah dad shaacab ah oo imika mashruuc baaba laga dhigtoo waxa sii qaadanaya shacab ah wax allaale waxay qabtaana ma jirto.

Tusaale ahaan marka gurigayga isa soo taago gaadhiga xashiishka gurayaa hadaan lacag la siin qashinka ma qaadayo, haddii ay dhacdo in qashin meel la soo dhigo ama neef bakhtiyey oon ku idhaa qashinkaa qaad ma qaadayaan, waxay odhanayaa qashin aanan lacag ka qaadin anagu ma qaadayno.

Anigu waxaan is leeyahay arrinkaas qashinku dhibaato badan ayuu dalka ku hayaa oo caafimaadkiiya oo iskuuladii ayuu dhinac kasta ka yaalaa, markaa in la adkeeyo oo xeer wanaagsan loo sameeyaa way fiican tahay, laakiin wuxuu u baahan in wax badan laga bedelo.

Wasaarada caafimaadka qayb hyiene la yidhaahdo ayaa jirtya ku shuqul leh, in la dar-dargeliyo oo la hawl geliyo ayaa loo baahan yahay oo wasaarada caafimaada lagu baraarujiyo dhibaatada waa loo baahan yahay wanaan soo dhawaynayaa. Waxa kale oo aan soo jeedinayaa dadkan la leeyahay ha lagu daro ee guddida ah aad Ayaan u soo dhawaynayaa waliba dumar ha laga dhigo Ayaan odhan lahaa, sababtoo ah ragu maba oga dhibaatada qashinkan. Waxaan leeyahay dumar ha lagu daro oo waliba xaafad kastaba gabadh ha lagaga daro.

Waxaan leeyahay xaga qarashka ku jira xeerkan dee imikaba qarashka dadka waa laga qaadaa oo hadana dadka xashiishka lagama guro. Waxaan soo jeedinayaa in xeerkan waxna lagu daro waxna laga badelo waayo waa xeer aynu u baahan nahay.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay. Imikana waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan:

**Md. Maxamuud Dhunkaal Guutaale**: Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Anigu horta xeerkan Maaraynta qashinka adkaha iyo dareeraha ah, halkaas waxa ka maqan iyo gas-ta. Plotution waa qayb ka mid ah qashinka isna waa in lagu daraa oo saddexdaa qaybood laga dhigaa. Markaa hore waxa inoo soo maray xeerka maaraynta Deegaanka oo Maarayni waa Maamul, waxaan leeyahay erayga “Maarayn” ha lagu badelo “Ilaalin”.

Xeerkan Maaraynta qashinka, xeerka maaraynta Deegaan iyo xeerka Duur-joogt meelo badan ayey iska soo galayaan oo deegaanka intuba qusaynayo in seddex chapter oo wada socdo laga dhigaabay ahayd mid walibana deegaanka meel ayuu ka soo gelayaa. Matalan ka ha deerto waxa uu ka hadlayaa kiimikada deeganka iyo caafimaadkaba waxyeelo ayuu u keeni karaa oo noole badan oo daaq ha noqoto, ma duur-joog ha noqoto ama dadba ha noqotee waxyeelaynaysa.

Haddaan hoos ugu dhaadhaco qodob kana qodobka u horeeya ee aan anigu is dul taagayo waxa weeye qodobka saddexaad oo ah Wasaarada. Sida uu dhigayo xeerka deegaanku Wasaarada deegaanka iyo horumarinta reermiyag ayaa leh maamulida, ilaalinta iyo horumarinta deegaan ka dalka.

Erayga qashin waxaan u macnaystay hadhaaga wixii la isticmaalay een munaafacaad lahayn inay nopqnayso, markaa deegaanka sidii rag horeba uga hadleen wax aka leh Wasaarada Caafimaadka in la hoos geeyo oo line minister ay u noqoto.

Waxa loo samayn karaa guddi (Broad) oo deegaankuna ka mid yahay, laakiin in Wasaarada deegaanku maamusho qashinka anigu waxaan leeyahay awoodaa iyadu ma wada leh ee

Wasaarada Caafimaadka oo iyadu ku ilaalinaysaa Dawaladaha hoose ayaa shaqadaa leh. Waxa kale oo halkan ku qoran oo aad moodaa in lagu koobay magaalooyinka oo qudha, laakiin qashinku magaalana wuu ka abuurmi karaa miyagana wuu ka abuurmi karaa, markaa dee qashin magaalo ayuunbuu xeerkani ka hadlayaa.

Matalan wakhtiyadii dhawayd ee abaaruhu dhaceen waxaad ogadayeen wax allaale wixii noole ahaa haday duur-joog ahayd iyo haday xoolo ahaydba waatii abaartu laysay, wixii dareere ahaa waxay iska raaceen carrada, laakiin lafidhii qofkii miyigaa u baxaa wuu arki karayaa inta meelahaas dul taala.

Bakhtiyadaa meelahaas ayaalaan waa qashin aan magaalada soo gaadhin, Iyana waxa jirta saliidak xumaatay oo meelahaas gawaadhiga laga siidaynayo oo daaq aanu ka baxayn, iyadana sidoo kale waxa jirta dhuxusha meelaha la dhigo way ma doobaataa oo daaqna kama baxayo Iyana waa in lagu daraa.

Dhanka kale si loo fahmo Iyana eray bixinta xeerka sida qashinka Adkaha ah wuxuu leeyahay waxa looga jeedaa aan dareere ahayn, ama aan ahayn hawo ee la iska tuuray, markaa hawadaas wuu ku soo daray waxaan hadana ku macneeyey inay tahay qashin, markaa qashin sidaas ayaa lagu saftiiray hawaduna kuma jirto ha lagu soo daro Ayaan leeyahay.

Waxaan leeyahay xeerkan iyo xeerka deegaanku way isku eegyihiin waxaan leeyahay waa in xeerkan la hoos geeyaa Wasaarada Caafimaadka dawladaha hoosana wax laga siiyee.

**Md. Cabdilahi Xuseen Cige:** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa. Waxaan ka hadlayaa qodob yar yar oo xeerka ka mid ah iyo xeerka laftiisaba. Si aanay u dhicin hay’ado dawlada ka tirsan in aynu madax isu gelino waxaan soo jeedin lahaa anigu in xeerkan dib loogu noqdo Dawladaha hoose iyo Wasaarada Caafimaadka loo yeedho si ay qayb uga noqdaa ma waafaqsan yahay shuruucda hore ee jirtay ee Goleyaasha iyo Qarankaba ka soo baxday.

Xeerkani wuxuu waajibinayaa cashuuro am ta kiilaaf kale oo qaado, isla xeerka Gobolada iyo degmooyinka xeer no 23/ wuxuu shaqada xashiishka siinayaa in dawladaha hoose qaadaan oo waliba meheradaha iyo ganacsiga liisanka laga qaado uu ku jiro xashiishku oo marka hore sanadkii laga qadimo.

Kana wuxuu waajibinayaa qodobadiisa markaad aragto in shirkaduhu haddii uu qofku uu bixin waayo lacagta ay ka joojiyaan oo aanay qashinkii qaadayn qofkuna uu masuul ka yahay qashinka. Markaa si aanu iska hor imaad hay’daha dawlada oo aynaan si qab qabsi iyo xeer madaxa isu geliya aynaan u soo saarin, anigu waxaan soo jeedin lahaa in Wasaarada Caafimaadka iyo Dawladaha hoosaba loo yeedho oo ay xeerkan ka qayb qaataan. Haddii aynu soo saarno xeer cid awood gaar ah siinaya waxaynu madaxa isu gelinaynaa hay’adihii dawlada, markaa xeerkana waxa ku jira qaybo badan oo khuseeya Wasaarada Caafimaada, Dawladaha hoose iyo Wasaarada Deegaanka markaa saddexdaa aynu isugu yeedhno oo markaa xeer midaysan oo dalkam lagu hago soo saarno.

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan:** Guddoomiye waa talooyin wax ku ool ah markaa ma xuma in xeerka dib loo eego.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay. Imikana waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan:

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin**: - Guddoomiye laba arrimood ayaa isku keen barkan xeerarkan guddiduyadu inoo keento oo aad u liita iyo xildhibaanada oo aan akhriyin, waa mushkilad ina haysata, markaa waxa loo baahan yahay in ka gole ahaan aynu soo saarno nidaam la raaco (guide line) xildhibnaaduna waajibkooda gutaan oo wax soo akhriyaan si aynu u soo saarno xeerar tayo leh oo dalka anfaca.

Xeerku hadaanu mabaadii lahayn oo mabaadii hagaynin oo ciddii soo gudbisayna mabaadii ku keenin guddidiina mabaadii ku keenin xeerkaasi wuu jiho habaabayaa, markaa horta xeerkan mabaadii hagaysay way ka maqan tahay ee waa in mabaadii loo sameeyaa oo maxay mabaadiida xeerkan hagaysa ee uu ka shidaal qaadanayaa tahay, waa in aynu caddaynaa oo xeerka lagu cadeeyaa.

Ta kale saddex wasaaradood ayaa line ministry u ah, xeerar horena way jireen xeer fayo dhawrkaa jiroo kan uu Axmed kijaandhe ka hadlayo xeerkii fayo dhawrka oo Wasaarada caafimaadka hoos taga (In line) la ah, kana wuu soo galaya oo Wasaarada deegaankuna waxay ka soo galaysaa deegaanka oo halka qashinka lagu shubay oo bulaacadaha lagu shubayo iyadu hagtaa, fayo dhawrkuna waa in ay ku dabagashaa, halka dawlada hoose leedahay qaadistiis iyo ururintiisii. Markaa seddexdaa hay’adood ayaa u ah line minister.

Saddexaasiba waa in ay xeerka bud dhig u yihiin, waan in la helaa. Haddaba waxaan soo jeedinaa xeerkan tayo la’aan badan ayaa ka muuqata, waxaan ka muuqata in aanu goluhu soo akhriyin oo aanan aniguba soo akhriyin oo dibada Ayaan ka akhiriyey iyo wixii laga yidhi. Waxaan odhan lahaa xeerkan line ministry-gooda ha loo yeedho oo aniga waxay guddidu igu tidhi markii la yidhi keena ayuunbaanu keenee wax hawl ah oo aanu ka soo qabanay ma jirto. Markaa waxaan leeyahay halkan aynu ugu yeedhno inaga oo isticmaalayna sharci yaqaanada.

**Md. Ibraahim Axmed Raygal:** Xeerka kan maanta ina horyaala iyo xeerkii degaankam, xeerka duur-joogta iyo xeerka qashinku waa seddex xeer oo aan xogo badan ka hayey sidii looga shaqeeeyey. haddii aan ka imika soo qaato xildhibaanadu aad bay ugu sharfan yihiin doodaha ay soo jeedinayaa ana waxaan ku biirinayaa in yar xogogaalnimo ah oo aan ka war hayey, waxayna tahay xogtaasi waorshop iyo Wasaaradaas oo loo yeedhay intuba way dhacday markii laga shaqaynaayey, tii ugu dambeeyey waxa lagu qabtay hotel Guuuleed oo Wasaarada Caafimaadka, Wasaarada deegaan iyo Dawladaha hoose saddexduba wada joogeen.

Waxa kale oo ka mid ah labadii aan idiin sheegay iyo kanba in gobolo loo maray, dawladaha hoose laga qayb geliyey, Wasaarada Caafimaadka laga qayb geliyey, laakiine bini-aadamka xogtiisu ma dhamaato oo xildhibaanada waxa loogu keenay inay waajibkooda ka gutaan, waxa kale oo qorshaha ku darsataan in xeerkani khuseeyo Wasaarada Deegaanka, Wasaarada Caafimaad iyo Dawladaha hoose.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay. Imikana waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan:

**Md. Cabdikariim Aw Cali shabeel: -** Bismilaahi Raxmaani Raxmiim, Allahuma wasli Calaa siyidinaa Wa Mawlaaan Muxamad SCW. Waxaan anigu jecelahay in aan is dul taago saddex qodob. Xeerkan horta aad baan u soo akhriyey qodobadiisuna aad bay u badan yihiin, laakiin inta muhiimka ah ayaa hadalka laga raacaayee ee martudiisa iyo macnihiisa ah.

Soomaalidu waxay ku maah maahdaa laabdii talaababa tala aka dhex dhalata. Doodan aynu maanta halkan kaga hadlayno haddii aan sidaynu caado ugu lahayn si laab la kac ah aynu xeerarka u gali jirnay, laakiin xeerkan iyo xeerarka kaleba goluhu wuxuu u baahan yahay Guddoomiye iyo mudanayaalba in lagu daallo oo la lafo guro oo wax umaddan lagu dhaqayee aad looga fiirsado. Halkan xildhibaan jikijaandhe wuxuu ka sheegay hotel aan bulaacada lahayn, ee fara xalka lahayn iyo xaafadaha meel qashin lagu shubo lahayn, waxaan soo jeedinayaa dadku Canaan malaha. Haddii aan la helin koontaynaro meelahaas la dhigo oo qashinka lagu guro dadku qashinkii wadayd dhigayaan oo ku qubayaan, markaa waxaan soo jeedinayaa;

1. In la helo ama suuqyada dhexdiids ah noqoto ama xaafadaha dhexdooda ha noqoto horta meelo qashinka lagu daadiyo la helo, Sida caalamku u shaqeeyo.
2. Arrimaha fayo dhawrka meel ay hoose timaadaa wasaarada ma jirto, markaa waa in aynu sida caalamka kaga dayano weeyaan waxayna hoos timaada Dawladaha hoose. Dawladaha hoose waxa ku taalo qaybta fayo dhawrka, laakiin waa fadhiid oo cid dabagasha iyo hubisaa ma jirto, hotelada waa la iska siiyaa liisanka markaa waa in xeerkan lagu daraa ciqaabo ama lacag ama xadhig ha noqotee iyadu waa mid lagama maarmaan ah.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa haddii ay suurta gal tahay waa arrin ka wayn in la hoos geeyo Wasaarada caafimaadka, markaa anigu waxaan odhan lahaa ha la hoos geeyo dawlada hoose oo ha lagala tashado qodob badan oo ay ka mid yihiin halka lagu qubaayo, qashinka ha noqoto kuwa dareeraha ah ama kuwa adkaha ah, dabeedna loo sameeyo guddi dabagala dawlada hoose ama wasaarada arrimaha guddaha gudidaasi laga dhex sameeyo oo wasaarada arrimaha gudduhu ku dabo gasho. Haddii aan la helin cid dabagasha oo wixii khaldan ka daba tagta dee wixii baylah ayey noqonayaan. Inaga qudhigeenu dambi ayeynu leenahay intaas oo sanadood ayeynu golaha fadhinay, dadka magaalada degan ayeynu nahay ama magaalooyinka kale ee wadanka intaasba waynu iska indho tiraynay oo waynu arkaynay dhibaatada ka taagan qashinka, nadaafada iyo hodheelada.

Waxyaabaha ugu badan ee xanuunada faafa keena wax aka mid ah hudheelada wax laga cunayo haddii aan fayo dhawrkooda la sugi

Waxaan soo jeedinayaa oo hadalkayga ku soo koobayaa in xeerkan guddid loo saaro (Ordiol committee) loo saaro oo dabeetana cid aqoonta leh loo yeedho dawladaha hoosana loo yeedho, Wasaarada caafimaadkana cid looga yeedho, Wasaarada deegaankana cid looga yeedho

dabeedtana la tuujiyo oo la ururiyo si xeerkani mustaqbalka u noqda mid wax ka qabta arrimahaas aynu ka hadlaynau.

Wasaalu calaykum.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan:

**Md. Axmed Ducaale Bulaale: -** Guddoomiye iyo mudanayaal xeerkan guddidu cidii soo samaysaan amaanayaa ee inoo keentay in aynu ka doodno. Xeerkan marka point la helo waa in aad is duul taagtaa, sidii Dr Carabayto sheegay siyaasada xeerakan Wasaarada Caafimaadkaa is leh, Wasaarada deegaan ayaa ku shaqo leh Dawladaha hoose ayaa ku shaqo leh. Xeer markaynu samaynayno waa inaynu xeerarka inaga baxayna isla akhrinaa. Matalan xeerka deegaanku waa xeer aynu samaynay oo inaga baxay, wuxuuna sheegayey in qashinka Kiimikada ah Wasaarada deegaanku ku shaqo leedahay oo qashin hadhaaga ah, qashina shiidalada la baadhayo ka hadha in Wasaarada deegaanku ku shaqo leedahay.

Waxa kale oo inaga baxay xeerka ismaamulka Gobolada iyo degmooyinka oo sheegaya in dawladaha hoose nadaafada magaalooyinka ku shaqo leeyihiin. Halka siyaasada guud ee caafimaad ay ku shaqo leedahay Wasaarada Caafimaadka. Halkan waxaan u arkaa in laba xeer is dhexyaalo oo ah xeerka qashin (Waste management) oo aynu hore gacanta ugu haynay iyo nadaafadii (sanitation) ayaa is dhexyaala.

Waxaan soo jeedin lahaa markaynu ka hadlayno nadaafada magaalooyinka dadka ku shaqada lihi waa laba hay'adood oo kala Wasaarada Caafimaadka iyo Dawladaha hoose. Qashinkan hadhaaga iyo kiimikooyinka isna waxa ku shaqo leh Wasaarada Deegaanka, markaan waxaan soo jeedin lahaa xeerkani sidaas ayuu isku dhexyaalaa inta dib loogu noqdo ha la kala saaro oo mid ha noqdo qashinka (waste management) midna ha noqdo Nadaafada (Waste Managemnet).

Wabilaahi Tawfiiq.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay. Imikana waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan:

**Guddoomiye Cali Yuusuf Axmed:** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Waxoogaa yarbaan ku darsan lahaa, waxa ka mid ah xaga caafimaadka xoolaha iyo dadka. Cudurka ankaaris la yidhaahdo ee kudka soomalidu u taqaano meesha neef uu ku dhinto ee dhiigiisa iyo dheecaankiisu gaadho wuxuu samaynayaa in jeermiskaasi neefka halkaa daaqa uu ku dilo, kolkaas taasina in lagu soo daro ayey u baahan tahay; waxa ka mid ah Eyda suuqyada iyo magaalooyinka tuulan, haddii ay qaadaan cudurka raymiska iyagana dhibaato fara badan ayaa ka imanaysa, waxaan u xil saaran in Dawlada hoose Eydaasi ka layso.

Barrigii hore waxa iska qaashan jiray dawlada hoose iyo Wasaarada Xanaanada Xoolaha. Wasaarada xanaanada xooluhu waxay keeni jirtay sun marka hilibka loogu daro uu daqiiqado uu ku dhimanaayo Eygaasi.

Waxa kale ku dari lahaa dharka second hand cltothes la yidhaahdo. Suuqa santarka Hargeisa haddaa marto waxaad arkaysaa kayshaliyo, nigisyo, sharaabaado iyo garamo lagu iibinayo, waxaas oo dhamina cudur ayey keenayaa waana fool xumo dhaqaale ay inoo baajinayaana ma jirto. Waxa kale oo second hand ka mid electronics, markaa electronics waa sun oo Yurub waa la iska tuuraa oo meel ayaa lagu ururiyaa, iyaga oo aan waxba joogin ayaa la soo qaataa, waxaana ka mid ah jaarjarka, mobilada, TV-yada bahaladaasi marka halkan la keeno muddo badan ma shaqeeyaan waan sun dhulka lagu daadinayo oo la iska fogeeyey ayeynu inaguna lacag ka soo bixinaa, kuwaasi Iyana waxay u baahan yihiin in lagu daro.

Xaga guddida waxaan ku soo dari lahaa in Wasaarada Xanaanada Xooluhu Iyana ka mid noqoto waad salaaman tihiin.

**Goddoomiyaha Golaha Wakiilada:** Bismilaahi Raxmaani Raxiim doodii way inoo dhamaatay, rayiyo badan baa la soo jeediyey, guddidii iyo dhaqaatiirta cidbaa ku darnay dibna ha ula noqoto xeerkan guddidu. Ha loo yeedho saddexdii la sheegay ee Wasaarada Caafimaadka, Wasaarada Deegaanka, Dawladaha Hoose iyo Wasaarada Xanaanada Xoolaha. Hal wiig ayaanu idin siinayn, wiigaa xeerka oo tafatiran ha lagu soo celiyo Golaha waxaanan ku darayaa;

1. Xildhibaan Axmed Maxamed Carabayto oo dhakhtar ah.
2. Xildhibaan Axmed Cabdi-nuur Kijaandhe oo ka shaqayn jiray iyo
3. Xildhibaan Baar Siciid Faarax.

Saddexdaas Ayaan ku kordhiyey, wiigbaa laga soo shaqaynayaa wiig dabadiina Golaha ayaa la keen fadhiguna wuu inoo xidhan yahay.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**

-----------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**

---------------------------------------